Maxaan samaynayaa haddii uu cudurka la igu aqoonsaday?

# FURUQA DAANYEERKA

**Waxaa la ii sheegay inaan qabo miduun mid macquul ah ama xaalada la xaqiijiyay ee furuqa daanyeerka, maxaan u baahanahay inaan ogaado?**

## DAAWAYNTA FURUQA DAANYEERKA

Ma jiraan wax daawayn ah ah gaar u ah caabuqyada cudurka furuqa daanyeerka iyo fayraska furuqana hidda side ahaan waa isku mid, kaas oo macnaheedu yahay in dawooyinka fayraska ku lidka ah loo sameeyay si ay uga hortagto furuqa ayaa loo isticmaali karaa in lagu daweeyo caabuqyada fayraska furuqa daanyeerka.

Fayraska qaar waxaa lagula taliyaya dadka oo ay aad u dhici karto in aad loo jiranaado, sida kuwan nidaamyada difaacooda jidhku daciifo. Kala hadal adeeg bixiyahaaga daryeelka caafimaadka wax ku saabsan doorashooyinka dawada ku lidka ah fayraska ee adiga kugu habboonaan lahayd.

Adeeg bixiyahaaga daryeelka caafimaadka waxay kula talin karaan noocyada daawaynta ku salaysan astaamaha.

## KA ILAALI KUWA KALE EE ADIGA KUGU XEERAN

- Guriga isku go'doomi muddada jiradaada
- Haddii aad qabto finanka ama astaamo kale, joog gudaha qol gooni ah oo ka fog dadka ama xaywaanka rabaayada ee aad la nooshahay, marka ay suuragal tahay
- Iska ilaali inaad galmo ahaan ku dhawaato qof kasta ilaa finanku bogsadaan, nabarada finanku ay dhacaan, oo ay leeyihiin lakab daray ah oo maqaarka ah

## MUDDADA FAAFITAANKA

Furuqa daanyeerka waxay ku faafi kartaa laga bilaabo wakhtiga astaamahu bilaabmaan ilaa finanku ay bogsoodaan, dhammaan caabuqyada nabaraduna ay dhaceen, iyo lakab daray ah ee maqaarka ku samaysmay.

Jirada caadi ahaan waxay gaadhaysaa 2-4 todobaad.

**Haddii ay astaamahu ka sii daraan, la xidhiidh adeegbixiyaha daryeelka caafimaadka wixii daawayn dheeraada ah.**

**luumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan dilaaca cudurka, booqo CDC.gov/Monkeypox ama Michigan.gov/MPV.**

Ingham County Health Department

La cusboonaysiiyay Juulay 29, 2022